



Tabta Lagu soo uruurinayo qaybaha yar-yar Ayaa Tafaasiir ka Bixin doonta sunta Arsenic

Dhulka Faddarada Ciidda ee Xaafadda South Minneapolis, Minn.

August 2005

Si aad u hesho akhbaar dheeraad ah

Si aad u hesho war dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca qaybo uruurinta, ama aad u jeediso su'aalo kale oo la xiriira tirtirista sunta arsenic ee guryaha Minneapolis, la xiriir mid ka mid ah xubnahan kooxda EPA:

Cheryl Allen

Community Involvement Coordinator (Isuduwaha Ka qayb-galka Bulshada)
EPA Gobolka 5aad
(312) 353- 6196
allen.cheryl@epa.gov

Tim Prendiville

Remedial Project Manager (Maamulaha Mashruuca Hagaajista)
EPA Gobolka 5aad
(312) 886-5122
prendiville.timothy@epa.gov

Soo wac EPA Gobolka 5aad si bilaash ah, 9 subaxnimo. ilaa 4:30 galabnimo, (800) 621- 8431

Robert Anderson

Project Manager (Maamulaha Mashruuca) Minnesota Department of Agriculture (Waaxda Beeraha ee Minnesota)
(651) 297-5931
robert.anderson@state.mn.us

Waxaad xor u tahay in aad ka aragto dukumeentiyo la xiriira dhulka Faddarada Ciidda ee Xaafadda South Minneapolis, iyo weliba dhulkii shirkadda CMC Heartland Lite Yard Superfund adigoo ka fiirnaya:

Machadka la yiraa Green Institute
2801 21st Ave., S., Suite 100
Minneapolis

Minneapolis Public Library (Maktabadda Shacabka ee Minneapolis)
East Lake Branch
2727 E. Lake St., Minneapolis

Sustainable Resources Association
(Ururka Ilaha Waara)
1916 2nd Ave. S
Minneapolis

Waxaa dhawaan bilaabmi doona xeelad saddex-marxaladeed ah oo lagu fulinayo baarista dheeraadka ah ee laga samaynayo faddarada sunta arsenic ee gaartay dhowr xaafadood oo Minneapolis ku yaalla. Wareeggan cusub ee lagu soo uruurinayo qaybo yar-yar (sampling) oo ciid ah waxuu Hay'adda Ilaalada Deegaanka ee Maraykanka Gobolka 5aad (U.S. Environmental Protection Agency Region 5) ka caawin doonaa in ay wax dheeraad ah ka barato nidaamka waxtarka leh ee lagu xallin karo dhibaataada faddarada sunta arsenic.

Qaybaha yar-yar ee ciidda ee laga soo uruuriyey guryaha ku yaalla xaafadda East Phillips ayaa muujiyey in uu jiro caddad sunta arsenic oo ay EPA u aragto in uu yahay mid khatar ah. Ciidda faddaraysan ayaaba hadda laga soo saaray ku dhawaad 30 guri oo ku dhow dhulka shirkadda CMC Heartland Lite Yard Superfund. EPA waxay aaminsan tahay in sunta arsenic ay ku soo gashay deyrarka guryaha markii boor ka soo kacay hawlgalkii CMC ay dabashu usoo qaaday xagga iyo deyrarkaas muddo 30 sano ah ka hor.

Iminka EPA waxay rabtaa in ay soo uruuriso qaybo yar-yar oo ciid ah oo dheeraad ah si ay u goyso heerka ay gaarsiisan tahay faddarada sunta arsenic. Qaybaha yar-yar ee la soo uruuriyaa waxay EPA ka caawin doonaa in ay ogaato xaafadaha gaarka ah ee ay sunta arsenic halis toos ah u geysan karto degganeyaasha. Xaafadahaas waa la nadiifin doonaa isla marka suurogal ahba. Mashruucu waxuu weliba EPA ka caawin doonaa in ay go'aamiso habka ugu fiican ee sida dhakhsada ah loogu tiritiri karo sunta arsenic.

Qodob kale oo ka tirsan mashruucan ayaa ah in la baaro faddarada laga yaabo in ay dhulka hoostiisa aad u gashay. Waxaa laga yaabaa in tani aysan halis toos ah u geysanayn caafimaadka dadweynaha, laakiin waxaa dhici karta in loo baahdo in iyadana la tirtiro taariikh dambe.

Marxaladda Kowaad

Marxaladda ugu horraysa ee dadaalkan cusub waxay ka kooban tahay in horta qaybo ciid ah laga soo uruuriyo ku dhawaad 60 meelood, kuwaasoo intooda ugu badan ay bari ka jiraan waddada Hiawatha Avenue. Guryaha laga soo uruurin doono qaybaha yar-yar waxay ku dhex yaallaan wareeg-goobeed wax yar ka hooseeya hal mile marka cabbiraadda laga soo bilaabo dhulkii CMC. (Fiiri khariidadda Bogga 2aad si aad qiyaas ahaan u ogaato goobaha qaybo uruurinta.)

Marxaladdan waxaa loogu talagalay in lagu soo helo jihada guud ee ay dabashu u qaaday boorkii wattay sunta arsenic muddadii ay hawlgalka waday shirkadda CMC Heartland Lite Yard. Goobaha qaybo uruurinta hore ayaa loo gooyey, oo EPA ayaa shakhsi ahaan uga wargelinaysa gurileyaasha in qaybo yar-yar oo ciid ah laga soo uruurin doono guryahooda.

Marxaladda Labaad

Inkastoo marxaladda ugu horraysa loogu talagalay in ay EPA uu muujiso dhinaca ay faddaradu u safartay, marxaladda labaad waxaa loogu talagalay in lagu ogaado sida ay u fogaatay ama halka ay gaartay. Tan ayaa keeni kartaa in ay EPA qaybo yar-yar ka soo uruurin doonto meelo dhowr halbeegga yard dhaafsan halka mile marka cabbiraadda laga soo bilaabo dhulkii CMC. Haddii la soo koobo, labada marxaladood ee ugu horreeya waxaa loogu talagalay in faddarada loogu raadiyo hannaan, iyo weliba in ay EPA fikrad dhaanta ka siiyaan meelaha ay sida xooggan ugu faaftay sunta arsenic. Marxaladda Labaad waxay gacan ka dhiiban doontaa in xisaabta laga saaro xaafadaha aan iyagu u baahnayn in laga nadiifiyo sunta, laakiin marxaladdan waxay weliba gacan ka dhiiban doontaa in la ogaado xaafadaha u baahan waxqabad degdeg ah.

Marxaladda Saddexaad

Marxaladda saddexaad waxay iman kartaa gooraha dambe ee mashruuca, waxayna ka koobnaan doontaa in qaybo yar-yar laga soo uruuriyo dhul kastoo ka tirsan goobaha “halista ah” ee lagu sugi doono labada marxaladood ee ugu horreeya ee qaybo uruurinta.

